

Febraayo 21, 2024

## **'Guulaha' Aan caadiga aheyn: Dugsiga Robert Shaw Theme ayaa Loo aqoonsaday Mid ka mid ah Kuwa Qaranka ugu Wanaagsan**

Dugsiga Degmada Gobolka DeKalb wuxuu aad ugu faraxsanyahay inuu ku dhawaaqo in Dugsiga Robert Shaw Traditional Theme inay u aqoonsadeen sida Dusiga Guuleystay ee 2023 Xeerka Dugsiga hoose iyo Sare Qaran (ESEA). Sharfidaan waxay marqaati u tahay dadaalka iyo ka go'naanta ardayda, macalimiinta iyo shaqaalaha si ay u siiyan waxbarasho heer sare maalin walba.

Ururka Qaranka ee Maamulayaasha Barnaamijka Gobolka ESEA (NAESPA) ayaa abaal marin qaran siiyay laba ka mid ah dugsiyada ugu waxqabadka sare ee Title I ee gobol walba. Gudaha Georgia, boqolkiiba shanta ugu wax qabadka sare dugsiyada Title I, sida ku saleysan ELA iyo buundada Qiimeynta Guusha Xisaabta, ayaa u qalma inay codsadaan abaalmarintaan.

“Tan waxay guul weyn u tahay Dugsiga oo loogu talagalay Dugsiga Robert Shaw Traditional Theme! Waxay si joogto ah u muujisaa heerka sare ee tacliinta, guusha ardayga, iyo ka go'naanta aan leexleexadka laheyn ee qiyamyadeena muhiimka ah, u jaheynta dadaaladeena isku kalsoonni *Badelka Heerka sare*,” Kormeeraha guud ee DCSD Dhaqtar Devon Q. Horton ayaa yiri.

“Dugsiga Robert Shaw Traditional Theme ayaa sameeyay tallaabo cajiib ah oo lagu siiyo waxbarasho heer sare arday walba oo uu u adeego,” Kormeeraha guud ee Dugsiga Gobolka Richard Woods ayaa yiri. “Waxaan si kal iyo laab ah ugu hambalyeynayaa macalimiinta, shaqaalaha, ardayda, iyo waaladiinta Dugsiga Robert Shaw Traditional Theme sharaftaan qaran ee ay mudanyihiin. Waxaan uga mahadcelinayaa sida wanaagsan ee ay ugu matalleen Georgia masraxa qaranka.”

Robert Shaw waxaa siiyay \$20,000 deeq ah barnaamijka GaDOE Title I, Qeybta A. Deeqdaan waxaa loo isticmaalayaa in lagu daboolo qarashaadka diiwaangelinta kooxda dugsiga si ay uga qeybgalaan Shirweynaha Qaran ee ESEA 2024 iyo in lagu taageero barnaamijyada Title I.

NAESPA ayaa aqoonsatay Dugi walbo Guuleystay ee Qaranka ESEA iyagoo u soo bandhigeyso baakida abaalmarin gaar ah, qeybta ka go'naanta ee websaydka Shabakada ESEA, iyo bandhig gaar ah ee Shirka Qaranka ESEA, kaasoo horaantii bishaan ka dhacay Portland, Oregon.

Shirka wuxuu soo bandhigay kulamo door ah oo soo bandhigayo Sheekooyinka Guusha ee Dugsiyada Guuleystay, iyagoo tilmaamayo shaqadooda muhiimka ah ee sida weyn loogu hormarinayo tayada waxbarashada ardaydooda. Ka qeybgalayaasha Dugsiga Guuleystay ayaa la xusay inta lagu jiray dhowr munaasabad oo shir gaar ah.